

— 748 —

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 72, taariikh 1.11.1989:  
Meelmarinta oggolaanshaha ku biiridda Heshiiska Caa-  
lamiga iyo Borotokoolkiisa ee la xiriira badbaadinta  
Dadka ee Badda.

**MADAXWEYNAHA JDS**

MARKUU ARKAY: Qod. 67, faqradda 5 iyo Qod. 82, faq-  
radda 4 ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disem-  
ber 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 36 ee 1.11.1989  
Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga ku oggolaaday ku  
biiridda Heshiiska iyo Borotokoolka Xeerkan ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYEEY: In ay lagama maarmaan ta-  
hay in oggolaanshaha ku biiridda Heshiiskan la meelmariyo;

**WUXUU SOO SAARAYAA**

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meelmariyey oggolaanshaha ku biiridda JDS  
Heshiiska Caalamiga ah ee la xiriira badbaadinta Dadka ee  
badda oo lagu go'aansaday magaalada LONDON sannadka  
markuu ahaa 1974 iyo Borotokoolka la xiriira ee 1978.

Qod. 2aad

Heshiiska iyo Borotokoolka ku tilmaaman Qodobka sare  
waxay Dalka JDS ku yeelanayaan awood sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa isla marka uu saxiixo  
Madaxweynaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Ras-  
miga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1.11.1989

**MADAXWEYNAHA JDS**  
(Maxamed Siyaad Barre)